

MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

Topiramate Actavis

Dawaynta qalalka

! Xog muhiim ah!

La xidhiidh dhakhtarka, shaqaalaha farmasiiga ama kalkaalisada ka hor inta aanad qaadan Topiramate Actavis jhaddii aadka xanuusanayso:

- dhibaatooyinka kelyaha, gaar ahaan dhagaxaanta kelyaha, ama aad qaadato maydhida kelyaha
- wax aan caadi ahayn gudaha dhiiga ama dheecaanka jidhka (metabolic acidosis)
- dhibaatooyinka beerka
- dhibaatooyinka miisaanka

- dhibaatooyinka indhaha, gaar ahaan caddaadiska wiilka isha
- dhibaatooyinka korniinka
- ama haddii aad qaadato cunto aad u dux badan (cunto barootiinka iyo duxdu ku badantahay)

Topiramate Actavis 50 mg, 100 mg iyo 200 mg kiniin dahaadh khafiifa leh oo ka kooban lecithin (saliida sooyaha). Ha qaadan dawadan haddii aad xasaasi ku tahay lowska ama sooyada.

Sida loo isticmaalo Topiramate Actavis

Had iyo jeer u qaado Topiramate Actavis sida uu ku faro dhakhtarku. Haddii aanad hubin, waa in aad raadisaa tallada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiigaaga Daawaynta caadi ahaan waxay ku bilaabantaa dawo qaadasho aad u hoosaysa, taas oo markaa aayar aayar u korodha. Waxay qaadan kartaa muddo in la helo dawo qaadashada adiga kugu habboon. Kiniinka Topiramate Actavis waa in dhammaan la wada qaato. Weligaa qaado qayb kiniinka ah. Iska ilaali calaalinta kiniinka maxaayeelay waxay yeelan karaan dhadhan qadhaadh. Kiniinkan waxaa la qaadan karaa ka hor, middada ama ka dib cuntadda. Cab in badan oo dareere ah muddada maalintii si la isaga ilaaliyo samayska dhafaxaana kelyaha markaad qaadanayso Topiramate Actavis.


Intee in leeg ayay daawayntu soconaysaa?

Dhakhtarkaagu waxa uu si wada jir ah adiga kuula go'aamiyaa ilaa inta daawayntaadu socon doonto. Waa muhiim in aanad joojin daawayntaada adigoo la xidhiidhin dhakhtarka Joonta kediska ah ee dawada Topiramate Actavis waxay keeni kaeraa halis kordhaysa oo tirada suuxdinta ah Haddii, sabab kastaba, daawayntaadu joogsatay, qadarka dawo qaadashada waa in loo yareeyaa si aayar aayar ah sida lagu sheegay dawo qorista aad ka hesho dhakhtarkaaga.



Maxaan yeelayaa haddii aan qatay in aad u badan oo Topiramate Actavis ah?

Iska markaaba raadso talo caafimaad. Sii qaado xidhmada dawada. Waxaad dareemi kartaa lulo ama daal ama khibrad dhaqdhagaqaaq aa caadi ahayn oo jidhka ah ama dhibaatooyinka istaaga ama socodka, dareemi dawakhaad ay ugu wacantahay caddaadiska dhiiga oo hooseeya ama khibrada garaaca wadnaha oo aan caadi ahayn ama gariir.



MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

Topiramate Actavis

Dawaynta qalalka

Maxaan samayn doonaa haddii aan ilaabo in aan qaato dawadayda?

Ha qaadan kiniin dheeraad ah si aad ugu magdhowdo dawa qaadashadii la ilaabay. Haddii aad ilowday in aad qaadao dawadaada, waydii dhakhtarkaaha sida aad dib ugu bilaabayso. Tani aad bay muhiim u tahay haddii muddo wakhti ah ay dhaaftay laga bilaabo dawa qaadashadaadii u damabaysay.



Waa maxay saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ee aadka loo yaqaanaa?

Sida dawada kale, Topiramate Actavis waxay sababi kartaa saamaynta dawo oo aan wanaagsanayn, laakiin ma aha dadka oo dhan ee qaadanayaa in ay lama huraan ahaan la xanuusanayaan/ Saamaynta dawada aan fiicnayn " si aad u badan" ah waxay dhacdaa in ka badan 1 qof 10 bukaan jiif ay ka mid tahay miisaan dhimid, dareeno xanxanto leh oo lugaha iyo gacmaha ah, hurdo ama lulo, dawakhaad, daal iyo walbahaar.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee ku jirta xidhmada.

Maqaadan karaa dawooyin kale?

Saamaynta dawada aan wanaagsanayn ee Topiramate Actavis waa ay isbeddeli kartaa oo waxaa jiri kara halis jor dhaysa oo saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn haddii aad qaadato dawooyin gaar isla wakhti. Qoraalka taxa kuwan waxaa laga heli karaa warqadda macliimaadka ee ku jirta xidhamada.

Had iyo jeer u sheeg dhakhtarka haddii aad qaadanayso ama aad dhawaan qaadatay dawooyin kale. Tan waxaa ka mid dawooyin la qaato iyagoon lagu qorin iyo daawaynta dabiiciga ah.

Gaadhi ma kaxayn karaa?

Dawakhaada iyo dhibaatooyinka araga waxa ay ku dhici karaan muddada daawaynta Topiramate Actavis. Gaadhi ha wadin oo ha ku shaqayn qalabka



mishiinada adigoo la xidhiidhin dhakhtarkaaga. Si kastaba ha ahaatee, xusuuso marka aad suuxdinta leedahay, laguuma ogola in aad gaadhi kaxayso marka aad soo dhaaftay hal sano oo buuxa oo aan suuxdin lahayn.

Ma cabbi karaa khamro?

Waa in aad feejignaan ka samaysaa khamrada maxaayeealay cabbitaanka khamradu waxa qayb ka qaadanayaa saamaynta Topiramate Actavis. Tan kala hadal dhakhtarkaaga.

Uurka iyo naasnuujinta

Haddii aad uurleedahay ama aad naasnuujinayso, ka feker in aad uuraysan doonto ama aad qorshaynayso in aad uur yeelato, raadso waanada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiiga ka hor inta aanad qaadan dawada. Dhakhtarkaagu waxa uu go'aamin doonaa haddii aad qaadan karto Topiramate Actavis. Si la mid ah dawooyinka suuxdinta ku lidka ah, waxaa jirta halista ilmahaaga aan dhaln haddii Topiramate Actavis la qaato muddada uurka. Hubi in aad si buuxda u fahamto halisaha iyo faa'iidooyinka qaadashada Topiramate Actavis. ee ku lidka ah suuxdinta muddada uurka.



Haddii aad naasnuujiso marka aad qaadanayso Topiramate Actavis, waa in aad wargelisaa dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan haddii ilmahaaga ay soo marto wax aan caadi ahayn



.....

.....

.....

.....

.....

